

# Muxuu ilmahaygu u qaadanayaan tallaalka COVID-19?

Tallaalka wuxuu caawiyaa carruurta in ay ka hortagaan cudurka COVID-19. Tallaalka wuxuu ilaaliyaa bulshada isagoo yareynaya faafitaanka COVID-19.



## Runtii carruurtu hadda ma u baahan yihiin tallaalka COVID-19?

Haa. Halista caabuqa COVID-19 wali waa sarrayasa. Sida ugu dhakhsaha badan ee carruurtu u helaan tallaalka, ayaa aad loo ilaaliyaa



## Waa kuwee tallaalka COVID ee ilmahayga 5-11 jir ah la siin doono?

Carruurta da'doodu u dhexeyso 5-11 sano ee Kanada waxay heli doonaan qiyaas yar oo ah tallaalka Pfizer-BioNTech (10 maykaroogaraam, saddex meelood meel qiyaasta loo isticmaalo dhalinyarada iyo dadka waaweyn). Qiyaaso yaryar ayaa si fiican ugu shaqeeya carruurta sababtoo ah waxay leeyiheen jawaab celin difaac adag marka loo eego dadka waaweyn. Waxay u baahan doonaan laba qiyaasood.



## Tallaalka COVID-19 ma badbaado buu u yahay carruurta?

Caafimaadka Kanada, dhowr saynisyahano iyo cilmi-baarayaal ayaa si taxadar leh dib u eegay caddeynta caafimaad ee la haayo mana qabaan walaacyo ammaan oo weyn oo ku saabsan tallaalka. Dhibaatooyinka soo raaca ee ugu badan ee tallaalka COVID-19 waxaa ay la mid yihiin waxyeelada fudud ee ay la kulmeen tallaalada kale, sida xannuunka goobta la muday, daal, jir xannuun, madax xannuun, qandho, iyo qarqaryo. Waxyeelooyinkan soo raaca ayaa soo hagaagaya dhowr maalmood ka dib.

Xaalado dhif ah, dhallinyarada qaarkood ayaa la kulmay barar muruqa wadnaha ah (myocarditis) ama xuubka dibadda ee wadnaha (pericarditis) ka dib markii ay heleen tallaalka COVID-19; badankooda waxay roonaadeen dhowr maalmood gudahood. Daraasadaha lagu sameeyay carruurta da'doodu u dhexeyso 5-11 sano ee qaatay tallaalka COVID-19, ma jiraan kiis bararka wadnaha ah. Inaad la bukoto COVID ayay aad ugu dhowdahay inay keento caabuqa wadnaha marka loo eego tallaalka.

**Tallaalka COVID-19 wuxuu ka caawin karaa carruurta inay caafimaad qabaan si ay dugsiga u joogaan oo ay waqtii ula qaataan asxaabtooda. Ilmahaaga tallaal sida ugu dhakhsaha badan!!**

Sax ah laga bilaabo 3-da Decembar, 2021

{REFUGEE}613

**TAIBU**  
COMMUNITY  
HEALTH CENTRE

Funded by:



Immigration, Refugees  
and Citizenship Canada

Financé par :

**OCASI**  
Ontario Council of Agencies Serving Immigrants

**WCH**  
WOMEN'S COLLEGE HOSPITAL  
Healthcare | REVOLUTIONIZED

Immigration, Réfugiés  
et Citoyenneté Canada